



Macluumaad cusub oo ku saabsan wanaajinta nidaamka dhanka ammaanka

Badbaadada ardayda iyo shaqaalaha waa walwalkayaga koowaad marka ay noqoto Dugsiyada Dadweynaha Portland. Iyada oo qayb ka tahay Maalgelinta Daymeed ee Caafimaadka iyo Badbaadada ee 2017-ka, qiyaastii \$5 malyuun ayaa loo qoondeeyay si loogu hagaajiyo nidaamka dhanka ammaanka dugsiga ee degmada oo dhan. Shaqadaasi, oo loo yaqaano Mashruuca Dugsiyo Ammaan ah, wuxuu isticmaalaa talooyinka qaranka ee habka ugu fiican oo diiradda la saarayo meel ammaan ah ka dhigida bannaanka dugsiga iyo kaantaroolka soo gelitaanta.

Mashruucu wuxuu hadda ku jiraa wejigii naqshadeynta iyada oo dhismaha la qorsheeyay in uu bilaabmo 2019-ka. Waxaa isku mar laga sameyn doonaa goobo kala duwan inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2019-20. Halkan waxaa ku qoran qaarka mid ah faahfaahinta:

Dejinta mudnaanta: Tallaabada koowaad waxay ahayd in la abuurdo nidaam dhanka darajada ah oo lagu aqoonsado dugsiyada mudnaanta sare la siinayo iyada oo lagu saleynayo waxyaabo kala duwan oo jira. Shuruudaha waxaa dejiyay Kooxda Shaqada ee Dhanka Ammaanka PPS oo ka kooban wakiilo badan oo dhanka anshaxa ah oo ka socda PPS (oo ay ku jiraan kooxda dhanka ammaanka, xarumaha, isku-duwidda dhanka anshaxa iyo agaasimayaasha degaanka) iyo Xafiiska Booliiska ee Portland Qaybtiisa Adeegyada Dhallinyarada.

Dugsiyada mudnaanta sare la siinayo waxay heli doonaan shaqada wejiga hore ee shaqada dhanka ammaanka. Dugsiyada soo haray ee leh heerarka mudnaantoodu tahay dhexdhexaad ama ka hooseyso waxaa dhammaantood wax lagaga qaban doonaa wejiyada dambe. ([Fiiri liiska mudnaanta ee dugsiyada](#))

Wakhtiga loo qabtay shaqada: Degmadu waxay dugsi kasta ku rakibi doontaa, nidaamyada elektarooniga ah ee la kaantaroolo oo soo gelitaanka dugsiga oo cusub, ama hagaajinta doontaa kuwa hadda jira, iyada oo lagu darayo calaamad booqdayaasha u soo tilmaamaysa albaabka muhiimka ah ee laga soo galo.

Shaqada naqshadeynta ee dugsiyada mudnaanta sare la siinayo ayaa isla hadaba socoda waxaana la dhammeystiri doonaa horraanta 2019-ka. Tallaabada xigta waa in la doorto qandaraaslayaasha dhismaha. Tani waxaa la qorsheeyay in ay bilaabanto horraanta 2019-ka, iyada oo dhismaha iyo hirgelinta hawshu ay bilaabmayso dabayaaqada wakhtiga xagaaga ee 2019 iyada oo sii socon doonta guud ahaan sanad dugsiyeedka ilaa laga dhammeystirayo. Waxaan qiyaaseynaa in rakibaada nidaamyada elektarooniga ah ee la kaantaroolo oo soo gelitaanka dugsiga ee dugsi kastaa in uu socdo qiyaastii laba toddobaad marka laga reebo dugsiyada sare, oo aan qiyaaseyno in uu qaadan doono afar toddobaad.

Nooca shaqada: Iyada oo ku saleysan hababka ugu fiican iyo maalgelinta la heli karo degmadu waxay diiradda saari doontaa rakibaada:

- Nidaamyada elektarooniga ah ee la kaantaroolo oo soo gelitaanka dugsiga, oo ay ku jiraan nidaamyada fiidiyowga iyo xirida albaabada oo elektaroonig ah oo lagu rakibayo albaabka muhiimka ah ee laga soo galo ee dugsi kasta. Nidaamkani wuxuu shaqaalaha dugsiga siiyaa awood ay ku arkaan cidda joogto dhismaha hortiisa, isla markaana u kaantaroolaan cidda soo geli karta ama aanan soo geli karin dhismaha.
- Ku darida sameecado ‘speakers’ dadka lagula hadlo oo dheeraad ah oo ku yaala hoolasha la maro, goobta jimicsiga iyo meelaha bannaanka ku yaala ee dugsiyada haddii aysan lahayn.
- Calaamad cusub ayaa lagu dari doonaa si booqdayaasha dugsiga ay ugu tilmaanto albaabka muhiimka ah ee laga soo galo isla markaana dadka faraysa in ay iska xaadiriyaan xafiiska guud.
- Deyr iyo albaabo dheeraad ah ayaa laga yaabaa in sidoo kale lagu daro iyada oo ku xiran baahiyaha goobta dugsiga iyo maalgelinta la heli karo.

Jadwalka shaqo ee la filayo ee ku saabsan mashaariicda dhanka ammaanka waa mid isbeddeli karo isaga oo ku saleysan helitaanka qandaraasle. Suuqa dhismaha ee Portland wuxuu sii wadaa in uu arko kobac aad u weyn oo ku yimid, iyada qandaraaslayaasha khibrada leh baahida loo qabaa ay sareyso. Degmadu waxay si taxadar leh uga shaqeynaysaa in ay isku keento tiro ah qandaraaslayaasha khibrada leh taasi oo loogu talagalay nidaamka tartanka loo galayo Mashruuca Dugsiyo Ammaan ah.

-David Mayne, Maamulaha Isgaarsiinta Maalgelinta daymeed